


Mustafa: waan ku salaamay saaxiib Aamiin,Waxaa jira su'aal i dhibtay sanado badan.

Aamin: Waan kaa qaaday saaxiib Mustafe, farxad bay ii tahay inaan maqlo su,aashaada. Maxaa ku dhibaya?

Mustafa: Macallimiinta Islaamku waxay i bareen in Ilaah dambigeyga iga cafiyi karo haddii aan towbadkeeno. Aniguna mar walba waxaan ka towbad keenaa dambiyadayda oo Ilaahay ayaan cafis waydiistaa, laakiin waxaan ahay mid aan hubin in Ilaah i cafiyay iyo in kale.

Aamin: Marka, waa maxay su'aashaada?

Mustafa: Waxaan ku waydiinayaa laba su’aalood:

1 towbadkaygu ma tirtiri karaa cadhada Ilaah?

2 Sideen ku ogaan karaa in Ilaah towbadayda aqbalay, oo uusan dambiyadayda igu xisaabin doonin?

Aamin: Aan ku bilowno su’aasha hore: ‘Towbadaydu Ilaah cadhadiisa mayga daari kartaa?’ Haddii aan si fudud u dhigo su’aasha: maxaa iga tirtiri kara cadhada Ilaah? Ma towbad baa?

Mustafa: Haa, towbadkeenku ma ku filan yahay inuu iga saaro cadhada Ilaah?

Aamin: Si aan uga jawaabo, waxaan ku weydiinayaa: maxaad uga baahan tahay inuu Ilaahay cadhadiisa kaa saaro?

Mustafa: Dambigayga darteed.

Aamin: Aan ku bilowno aabbaheen Adam. Wuxuu ahaa ninkii ugu horreeyay ee Ilaah abuuro, wax dambi ahna ma lahayn. Ilaah wuxuu siiyay wax walbuu uga baahnaa Jannada: hadday tahay xoolo, cunto iyo xaas. Markaasuu Ilaah ku yidhi: "Dhammaan geedaha beerta waad cuni kartaa, laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta ha cunin, maalintaad cuntid hubaal waad dhiman doontaa." (Bilowgii 2:16-17). Waxaa jira amar ah: "Ha cunin..." iyo ballan ah: "Waad dhiman doontaa." Markaa, maxaa ku dhacay Aadan markii uu cunay midhihii laga mamnuucay? Ma noolaaday mise wuu dhintay?

Mustafa: Wuu dhintay.

Aamin: Maxaa yeelay Ilaah wuxuu siiyay wixii uu mudnaa. Waxaa jira tusaalooyin kale badan oo Qorniinka ah. Qiimaha hal dambi waa dhimasho. Ganaaxa dambigu waa dhimasho. Sida Ilaah yidhi: "Mushaharka dambigu waa dhimasho." (Rooma 6:23). Adigu waxaad tidhi: "Waxaan u baahanahay in cadhada Ilaah iga baxdo sababtoo ah waxaan galay dambi." Laakiin bixinta dambigu ma aha towbad, ee waa dhimasho. Taasi waa sababta aad u dhiman doontid. Ilaah wuxuu ku siinayaa wixii aad kasbatay.

Mustafa: Ma fahmin.

Aamin: Ok, aan tusaale kale adeegsanno. Waxaad xaday $5000 gudaha Kenya, booliiskuna way ku qabteen, waxayna ku geeyeen maxkamad. Garsooruhu wuxuu kaa dalbaday inaad bixisid ganaaxa $5000. Maxaa dhici doona haddii aad dhahdo waan towbadkeenay?

Mustafa: Waxba, ma shaqaynayso.

Aamin: Maxaa yeelay, bixinta dambigu ma ahan towbad, ee waa $5000. Garsooruhu sharciga ayuu ilaaliyaa, isagaa go'aamiya ganaaxa. Haddii uu ku sii daayo adigoon bixin ganaaxii, garsooruhu waa musuqmaasuqe.

Mustafa: Ma cafin karo adigoon bixin ganaaxii?

Aamin: Maya, taasi cadaalad ma aha. Sidaas bay cadaaladdu u shaqeysaa, Ilaahna waa ka cadaalad badan yahay qof garsoore ah. Garsooruhu wuxuu go'aamiyaa ciqaabta dambigaaga, wuxuuna ku siiyaa xukunka ugu dambeeya.Kaliya dhimasho ayaa qancin karta cadaaladda Ilaah. Haddii ciqaabta dambigaagu ay towbad ahayd, toobaddu cadhada Ilaah way tirtiri lahayd. Laakiin toobaddu kuma filna inay qanciso Ilaahay dembigu waa wax culus Ilaah hortiisa, sidaas darteed ciqaabtu waa mid culus.

Mustafa: Laakiin Ilaah waa naxariis badane.

Aamin: Haa, laakiin sidoo kale waa garsoore caadil ah. Ma aha garsoore fasaxa xumaan falaha isagoon ganaaxiisii la bixin.hadii kale wuxuu noqon lahaa garsoore musuqmaasuqe ah.Sida Ilaah yidhi: "Kii kan sharka leh xaq ka dhiga,iyo kii kan xaqa ah gardarro ku xukuma,labadaba Rabbigu aad buu u karhaa." (Maahmaahyadii 17:15).

Mustafa: Laakiin anigu waxaan ahay muslim wanaagsan.

Aamin: Mustafe, ku tijaabi taas maxkamadaha Kenya. U sheeg garsooraha inaad haysan $5000, laakiin aad tahay: "Qof wanaagsan... u sheeg waan tukadaa, oo soomaa, sadaqadana waan bixiyaa."

Mustafa: Ma shaqaynayso.

Aamin: Cadaaladdu waxay dalbanaysaa bixinta ganaaxa… Iyadoo aan wax la bixin laguma sii deyn karo. Xukunkaagu wali wuu taagan yahay. Wax kaliya ee kaa samatabixin kara waa dhimasho. Towbaddu cadhada Ilaah kaama bixinayso. Camalkaaga wanaagsanna sidoo kale kaama bixinayo. Dambigaagu waa weyn yahay, sidaas darteed ciqaabtuna way weyn tahay.

Mustafa: Laakiin qof kale ma iga bixin karaa ganaaxayga?

Aamin: Waa su'aal wanaagsan. Haa, qof kale wuu kaa bixin karaa. Laakiin qofkaasi waa inuu yahay mid raba oo awooda inuu bixiyo. Haddii uusan rabin, ma bixin doono. Haddii uusan awoodina,Ilaah ma aqbali doono bixintaas. Haddii uu isagu dambiyo leeyahay, isna ma bixin karo, sababtoo ah isaguba waa xukun suge.Waa

inuu ahaadaa mid quduus ah, oo  aan dambi lahayn. Waa inuu Ilaah ahaadaa, sababtoo ah Ilaah oo kaliya ayaa sharcigiisa ilaalin kara. Sidaas darteed, Daa'uud wuxuu ku leeyahay Sabuurkiisa: "Runtii, nin kale ma furan karo naf kale, mana siin karo Ilaah qiimaha uu karabo naftaas; furashada noloshoodu waa qaali." (Sabuur 49:7).

Mustafa: Yaa iga bixin kara? Yaase  ii dhiman kara? Qofna iima jecla sidaas.

Aamin: Saaxiib, waxaan kuu hayaa war wanaagsan. Dhegayso sida Rasuul Bawlos yidhi: "Mar dhif ah mid waa u dhintaa nin xaq ah,mindhaase qof waa ku dhici lahaa inuu nin wanaagsan u dhinto.Laakiinse masiixu waa inoo dhintay intaynu wali dembiilayaaal ahayn,oo sidaasuu ilaah jacaylkiisii inoogu muujiyey.Haddaba haddaynu haatan dgiiggiisa xaq ku noqonnay,dee si ka badanna isagaynu kaga badbaadi doonnaa cadhada ilaah." (Rooma 5:7-9).

Saaxiib, bixinta dembiga waxaa la sameeyay. Markii Yeshuucu ku dhintay iskutallaabta, ereyadiisii ugu dambeeyay waxay ahaayeen: "Way dhamaatay." (Yooxanaa 19:30). Bixinta buuxda ee dembiga waa la bixiyay. Ilaah wuxuu dalbaday dhimasho, Yeshuucu ayaa bixiyay dhimashadii. Habka kaliya ee aad ku ogaan karto in Ilaah aqbalay bixinta dembigaaga waa inaad aaminto Yeshuuca. Kalsoonida dhimashadiisa ayaa kuu keeni karta nabada Ilaah. Sida Yeshuucu yidhi: "Anigu waxaan ahay jidka, runta iyo nolosha. Qofna uma imaan karo Ilaahay la'aantayda." (Yooxanaa 14:6). Ma jiro waddo kale oo aad Ilaah kula heshiin karto. Ilaahay wuxuu kugu leeyahay: "Aamin Yeshuuca, waad badbaadi doontaa." (Falimaha Rasuullada 16:31). Ma oran: "Waxaa laga yaabaa inaad badbaado." Wuxuu yidhi: "Aamin Yeshuuca, waad badbaadi doontaa." Ilaah ha kagu caawiyo inaad u jeesato oo aad kalsooni ku qabto isaga oo keliya si aad u badbaadiso naftaada.